HERITAGE INSTITUTE



# Xoolaha Soomaaliya

## Horumarinta Ganacsiga, Xoojinta Shuruucda iyo Kafaa'iidaysiga Caymiska

Juunyo 2024

# Tusmada


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Nuxurka Daraasadda | 4 |
| 2 | Hordhac | 6 |
| 3 | Habraaca Daraasadda | 7 |
| 4 | Ilaalinta Anshaxa | 9 |
| 5 | Natiijooyinka iyo Gorfaynta | 9 |
| 6 | Gunaanad | 27 |
| 7 | Tala bixinno | 28 |

## Ku saabsan Qoraaga

**Dr. Cabdinaasir Yuusuf Cismaan,** waa cilmibaare ku takhasusay cilmiga raadraaca cudurrada faafa iyo caafimaadka bulshada (epidemiologist), waxaanu xidhiidh qotadheer la leeyahay hay'adaha dowladda iyo ururrada caafimaadka ee bilaa xuduudda ah, isaga oo ka taageera hawlaha farsamada iyo dajinta hagayaasha istaraatiijiyadda. Waxa uu haysta shahaadada ka sarraysa PhD-da, shahaadada PhD-da, iyo Shahaadada Masterta oo uu ka kala qaatay Royal Veterinary College, Universiti Putra Malaysia, and Imperial College London, sida ay u kala horreeyaan. Dr. Cabdinaasir hadda waa cilmibaare ka tirsan Royal Veterinary College, University of London, ee dalka UK, waana xeeldheere arrimaha caafimaadka kalataliya Wasaaradda Caafimaadka, ee Dowladda Faderaalka Soomaaliya. Waxa kale oo uu lataliye u yahay Machadka Arrimaha Caalamiga ah ee Chatham House, ee dalka UK, Wakaaladda Caafimaadka Sweden iyo Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute for Policy Studies 2024.**

# 1. Nuxurka Daraasadda

Xoolaha nool ayaa door laxaad leh ka ciyaara haqab-beelka cuntada iyo hab-nololeedka bulshada Soomaaliyeed, balse waxa soo foodsaaray caqabado tiro badan oo ay ka mid yihiin adkaysin la'aan duruufeed, isu-dheellitir la'aan ka jirta heerarka dhoofinta iyo soodejinta xoolaha, qaabdhismeed sharci oo aan jirin, iyo fursadaha caymiska xoolaha oo ka maqan Soomaaliya. Haddaba, warqad-siyaasadeeddan ayaa u kuurgalaysa xaaladda ay hadda ku sugan yihiin nidaamka waxsoosaarka xoolaha, ganacsiga, qaabdhsimeedka sharciga, iyo qorshe-siyaasadeedka caymiska, waxaanay soojeedinaysaa istaraatiijiyado lagu horumarin karo xoolaha nool, si reer guuraagu ugu tallaabsado baraare  nololeed; oo la xiriira arrimaha deegaanka, dhaqaalaha iyo isbeddellada siyaasad-juquraafiyadeed.

Marka loo eego habraacyada loo isticmaalay daraasaddan, waxaannu adeegsanay habraacyo sahan oo isku-dhafan, annaga oo si dhammaystiran ugu kuurgalay nidaamka waxsoosaarka xoolaha, ganacsiga, qaabdhsimeedka sharciga, habraacyada iyo fursadaha caymiska xoolaha. Nidaamka xog ururinta waxa ka mid ahaa waraysiyo laga qaaday dad xog-ogaal ah, iyo doodo kooxeedyo loo qabtay dad xulaal ah iyo weliba lafagur lagu sameeyay isbeddelada suuqa ganacsiga xoolaha ee dalka gudihiisa intii u dhaxaysay sannadihii 2012 illaa 2022.  Si aannu u kaabno ilaha xogta oo ahaa kuwo xaddidan, waxa aannu si furfuran u dhexgallay dadweynaha deegaanka si aannu fahan wanaagsan uga hello caqabadaha iyo goldaloolooyinka la xiriira  waxsoosaarka xoolaha, ganacsiga, iyo qaabdhsimeedka sharciga, annaga oo qiimaynayna muhiimadda ay hirgalinta caymiska xooluhu u leedahay Soomaaliya. Falanqaymaha xogihii la helay iyo aragtiyihii laga guntay daraasaddan ayaa laga hindisay talabixinahan siyaasadeed oo ah kuwo laga soo dhiraandhirriyay natiijooyinkii cilmibaaristan, xog-ogaalnimadii daneeyayaasha, habdhaqannadii wanaagsanaa ee caalamiga ahaa iyo baahiyaha gaarka ah ee Soomaaliya.

Natiijooyinkayaga ayaa muujinaya caqabado badan oo haysta waxsoosaarka xoolaha,ganacsiga iyo qaabdhsimeedka sharciga. Caqabadahan ayaa isugu jira dhibaatooyin deegaan oo la xiriira waxsoosaarka iyo caqabado ku salaysan ganacsiga xoolaha; la'aanta qaabdhismeed sharci; maqnaanta qorshe-siyaasadeed; iyo caqabaha ku gadaaman hirgalinta caymiska xoolaha.

Daraasaddayada ayaa shaacisay caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin in xooluhu u daaqaan si tan-dhaaf ah marka la daajinayo iyo in la buuxdhaafiyo xerooyinka xoolaha, kuwaas oo ay xaaladahooda uga sii dareen abaaraha, isdhalanrogga cudurrada faafa, khilaafaadka,  xasiloonidarrada siyaasadda gobolka, awoodda dowladda ee liitada, iyo la'aanta qorsheyaal horumarineed oo loogu talagalay xooladhaqatada reer guuraaga ah.

Caqabadaha ku salaysan ganacsiga xoolaha waxa ka mid ah la'aanta xarumaha karantiimaynta oo yar; dhibaatooyinka maalgashiga iyo maalgalinta xoolaha; caqabadaha suuq-waaga iyo sayladxumaysiga, dhibaatooyinka ku saabsan heerarka tayada iyo shahaadooyinka caafimaadka; caqabadaha amniga; arrimaha isku isku-xirka dowladda; isbeddelka cimilada; caqabadaha la qabsiga tignoolajiyadda, baahiyaha kobcinta turuqa iyo tacliinta; xasiloonidarrada siyaasadda iyo xasil la'aanta qaabdhsimeedka sharciga.

Daraasaddan ayaa ogaatay in ay Soomaaliya ka jiraan hay'ado sharci iyo xarumo maamul oo ku shaqo leh arrimaha xoolaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, guddiyada ama maamullada suuq-geynta xoolaha iyo guddiyada baarlamaanka.

Si kastaba ha ahaatee, caqabado waaweyn ayaa ka dhex jira qaabdhismeedka sharciga, oo ay ka mid tahay diiwaangalin la'aani, sida Barnaamijka Shahaadada Caafimaadka Xoolaha Qaranka (NVAP) Heerarka iyo Hagayaasha Safarka Dhulka ee Xakamaynta Dhoofinta Xoolaha.

Marka la eego goldaloolooyinka ka dhex jira qorshe-siyaasadeedka iyo habraacyada, waxa aannu ogaannay in ay Soomaaliya ka maqan yihiin dhukmentiyo muhiim ah oo ay ka mid yihiin siyaasadda xakamaynta cudurrada; siyaasadda daryeelka xayawaanka; shuruucda dhoofinta iyo soodejinta; siyaasadaha xoolaha ee qaranka, heshiisyada iswaafajinta qorshe-siyaasadeedyada gobollada; shahaadada iyo hubinta tayada; shuruucda dawooyinka; iyo hababka loo maro bixinta shahaadada lagu hubiyo badqabka iyo tayada hilibka la dhoofinayo.

Sida oo kale, waxa la helay goldaloolooyin ka jira fursada caymiska xoolaha oo ay ka mid yihiin awooditaanka qiimaha caymiska; xog la'aan; halisaha ku salaysan isqardhaafka qiimayaasha suuqyada xoolaha, qalafsanaanta qorshaha siyaasadda, kaabayaasha iyo caqabadaha saadka/loojistikada; hubanti la'aanta isbeddelka cimilada; iyo arrimaha dhowrsanaanta xogaha.

Ugu danbayn, natiijooyinkan ayaa xaqiijiyay baahida loo qabo waxqabad ballaaran iyo siyaasado istaraatiijiyadeed oo lagu kobciyo adkaysiga iyo waaritaanka ganacsiga iyo waxsoosaarka xoolaha Soomaaliya. Istaraatiijiyadaha la soo jeediyay waxa ka mid ah in xoolaha loo maamulo si waaritaan leh, in la qaado tallaaboyin lagu kobcinayo ganacsiga xoolaha, in la xoojiyo qaabdhismeedka sharciga xoolaha, in la hirgaliyo caymiska xoolaha iyo in daneeyayaashu isu kaashadaan horumarinta xoolaha. Talabixintayadu waxa ay jid-khariiradeed u jeexaysaa dajiyayaasha siyaasadda, daneeyayaasha xoolaha, iyo saaxiibbada caalamka, si wax looga qabto caqabadaha jira, isla markaana kor loogu qaado adkaysiga iyo baraaraha waaxda xoolaha.

# 2. Hordhac

Xooluhu waa lafdhabarta qaabdhismeedka dhaqaalaha bulshada Soomaaliyeed. Qarniyo badan, ayay door weyn ku lahaayeen nolosha dadka Soomaaliyeed, iyaga oo si weyn uga soo qaybqaatay xasiloonida quutaldaruuriga,habnololeedka iyo dhaqaalaha bulshada.[1]

> *Wixii ka horreeyay dagaalkii sokeeye, xooluhu waxa ay ahaayeen lafdhabarta dhaqaalaha Soomaaliya, iyada oo ay bulshada Soomaaliyeed xooladhaqato ka ahaayeen (55%). 1980-aadkii, waxsoosaarka guud ee dalka waxa ay xooluhu ka ahaayeen 40%, welina waa horseedka waxyaabaha ay Soomaaliya dhoofiso*

Maadaama dalka intiisa badani tahay dhul oommane ah iyo oommane-xigeen, waxa uu deegaanka Soomaaliya leeyahay haykal dabiici ah oo ku habboon nolosha xoolodhaqatada reer guuraaga ah.[2] Wixii ka horreeyay dagaalkii sokeeye, xooluhu waxa ay ahaayeen lafdhabarta dhaqaalaha Soomaaliya, iyada oo ay bulshada Soomaaliyeed xooladhaqato ka ahaayeen (55%).[3] 1980-aadkii, waxsoosaarka guud ee dalka waxa ay xooluhu ka ahaayeen 40%, welina waa horseedka waxyaabaha ay Soomaaliya dhoofiso.[4] Xoolaha ayaa kaalin sare ku lahayd debbaraadda haqabbeelka cuntada, iyada oo ahayd isha ugu muhiimsan dakhliga qoysas badan oo Soomaaliyeed, gaar ahaan reer miyiga.

Inkasta oo ay soo foodsaareen amnidarro iyo colaado dabadheeraaday, adkaysiga xoolaha ayaa weli ku suntay heer mahadho leh.[5,6] Soomaaliya, waa xuddunta ugu weyn ganacsiga xoolaha nool ee ka gudba Gacanka Cadmeed, waxaana sannadkii 2015 lagu kala iibsaday in ka badan shan milyan oo neef oo laga dhoofiyay dekedaha Muqdisho,Berbera iyo Boosaaso. Ganacsigan, qaybta ugu badan (90%) waxa loo dhoofiyaa Bariga Dhexe, gaar ahaan xilliyada Xajka.

> *Marka laga tago muhiimaddooda dhaqaale, dhoofka xoolaha nool waxa uu leeyahay waxa ay leeyihiin muhiimad istaraatiijiyadeed oo ku xiran arrimaha bedqabka*

Marka laga tago muhiimaddooda dhaqaale, dhoofka xoolaha nool waxa uu leeyahay waxa ay leeyihiin muhiimad istaraatiijiyadeed oo ku xiran arrimaha bedqabka. Waxa tusaale cad u ah natiijadii Xanuunkii Rift Valley Fever, ee 2000 ka dillaacay magaalada Jiisaan ee dalka Sucuudiga, xilligaas oo uu dalka Sucuudigu joojiyay in loo dhoofiyo xoolaha Soomaaliya, taas oo saamaynteedu lafdhuungashay ku noqotay dhaqaalaha dalka.[7] Xannibaaddani ma saamaynin habnololeedka bulshada oo kali ah, balse waxa ay sida oo kale door ka qaadatay in ay dad Soomaaliyeed noqdaan burcadbadeed, illaa isciidamayntu noqotay ilo kale oo dakhli lagu raadsado.[8]

Walaaca ka jira arrimaha caafimaadka gudaha Soomaaliya, ayaa caddaynaya in ay Soomaaliya dhowaanahan mudnaanta siiso todoba cudur oo ka mid ah xanuunnada laga qaado xayawaanka (zoonotic diseases), kuwaas oo ay ka mid yihiin xanuunka ku dhaca Habdhiska Neefsashada ee loo yaqaanno (Middle East respiratory syndrome), Xummadda Rift Valley fever (RVF), Kudka(Anthrax), Dhukaanka (trypanosomiasis), Qaaxada (brucellosis), dulinka xiidmaha ku dhaca ee xayawaanka laga qaado (sida Gaardalaanbiyada iyo Gooryaannada (cryptosporidium), iyo durayga xayawaanka laga qaado (zoonotic influenza viruses).[9]

1. Too, R., Masake, R., Oyoko, G., & Onyango, D. (2015). The contribution of livestock to the Somalia economy. IGAD Centre for Pastoral Areas and Livestock Development (ICPALD).
2. Davies, J., Niamir-Fuller, M., Kerven, C., & Bauer, K. (2013). Extensive livestock production in transition. Livestock in a Changing Landscape: Volume One, 285-308.
3. Osman, A. Y., Mohamed, H., Mumin, F. I., Mahrous, H., Saidouni, A., Elmi, S. A., ... & Mor, S. M. (2023). Prioritization of zoonoses for multisectoral, One Health collaboration in Somalia, 2023. One Health, 17, 100634.
4. Majid, N. (2010). Livestock trade in the Djibouti, Somali and Ethiopian borderlands. London: Chatham House.
5. Ahmed, Muse, Mohamed Dahir Mohamed, and Faisal Muhammad. "Pastoralists Adaptation Strategies, and Resilience Capacity to Climate Change in Somalia: A Scoping Review." (2023).
6. Ncube, N. Q. O. B. I. L. E. (2019). Measuring resilience in Somalia: an empirical approach. University of South Africa.
7. Dar, O., McIntyre, S., Hogarth, S., & Heymann, D. (2013). Rift Valley fever and a new paradigm of research and development for zoonotic disease control. Emerging infectious diseases, 19(2), 189.
8. Chalk, P. (2010). Piracy off the Horn of Africa: Scope, dimensions, causes and responses. The Brown Journal of World Affairs, 16(2), 89-108.
9. Mumin, F. I., Fenton, A., Osman, A. Y., & Mor, S. M. (2023). Zoonoses research in Somalia: A scoping review using a One Health approach. One Health, 100626.

Maadaa oo ay Soomaaliya ku jirto marxaladdii sookabashada iyo dibudhiska, fahanka iyo soonoolaynta xooluhu  ma aha lamahuraan dhaqaale oo kali ah, balse waa hab lagu soo noolaynayo haqabbeelka cuntada, habnololeedka iyo xasiloonida bulshada Soomaaliyeed.

Haddaba, warqad-siyaasadeeddan, ayaa si qotadheer u lafaguraysa xaaladda ay maanta ku sugan tahay xoolaha Soomaaliya, caqabadaha haysta, iyo fursadaha horumarka waara iyo kor u qaadista adkaysiga xoolaha.

Waxa aannu si gaar ah u dhuganaynaa xiriirka murugsan ee ka dhexeeya nidaamka waxsoosaarka xoolaha, helitaanka suuqa iyo ganacsiga caalamiga ah. Waxa kale oo aannu iftiiminaynaa goldaloolooyinka siyaasadeed ee jira iyo sida ay tobannaanka sano fursad la'aanta caymiska xooluhu caqabadda ugu ahayd maalgashiga xoolaha. Ugu danbayn, waxa aannu soojeedinaynaa istaraatiijiyado horumarineed, kuwaas oo u gogolxaaraya  in reerguuraagu ku tallaabsado baraare  nololeed; oo la xiriira arrimaha deegaanka, dhaqaalaha iyo isbedbelleda siyaasad-juquraafiyadeed.

# 3. Habraaca Daraasadda

Dibu-eegis daraasadeed oo qotadheer ayaannu ku milicsaday dhigaallada duugaalka ah, kadibna waxaannu tagnay goobaha-shaqada, halkaas oo diiradda lagu saaray xaaladda ay hadda ku sugan yihiin nidaamka waxsoosaarka xoolaha, ganacsiga xoolaha, qaabdhismeedka sharciga xoolaha iyo siyaasadaha caymiska xoolahu.[10,11]

Si loo soo saaro aragti xisaab ku dhisan oo ku salaysan siyaasadaha xoolaha ee la xiriira ganacsiga, sharciga, habraacyada iyo caymiska xoolaha, oo ay weheliyaan goldaloollooyinka ka jira iyo caqabadaha ku xeeran xoolaha Soomaaliya, waxaannu adeegsannay noocyada kala duwan ee habraacyada  cilmibaarista, annaga oo tallaabooyinka cilmbibaarista ka qaybgalinnay muunaddii aannu ka qaadannay dadweynaha, halkaas oo lagu waraystay dad xog-ogaal ah, isla markaana doodo kooxeedyo loo qabtay dad xulaal ah (FGDs).

Falanqaynta xogta waxa loo adeegsaday hab-xisaabeed cilmibaariseed oo ku habboon qaabdaraasadeedkan. Xogihii laga soo dheegay warbixinihii maalinlaha ahaa waxa loo sii kala saaray hab mawduucaysan oo ku qotoma su'aalo cilmibaariseed oo la sii dajiyay. Kala saarista xogahan, ayaa lagu saleeyay in ujeeddo kasta oo cilmibaariseed yeelato habraac gaar ah, kadibna waxa mar kale loo sii kala guray xubno isweheliya,markaas baa la hufay oo la kala haadiyay. Kaqaybgalayaasha daraasadda waxa loo soo xushay si qorshaysan oo ku talagal ah.

10. Ahmed, M. M. (2020). Analysis of institutional dynamics and their influence on livestock export trade in the Berbera corridor of Somaliland (Doctoral dissertation, University of Nairobi).
11. Ng'asike, P. O. A., Stepputat, F., & Njoka, J. T. (2020). Livestock trade and devolution in the Somali-Kenya transboundary corridor. Pastoralism, 10(1), 27.

Waxa kale, oo aannu xog ururin ka samaynay dukmentiyada siyaasadda dowladda ee hadda jira, ee ku salaysan heerarka dhoofinta iyo soodejinta xoolaha, iyo sooyaalka caymiska xoolaha, annaga oo falanqayn qotadheer ku samaynay si aannu u ogaanno goldaloolooyinka iyo isqardhaafyada (midaysnaan la'aanta) ka jira siyaasadaha heer qaran. Arrintan midhadhalkeeda waa lagu guulaystay, iyada oo daneeyayaashii ka qaybgalay daraasadddan oo aannu xog-ogaalnimadooda u waraysannay ka kala socdeen hay'adaha sharciga(n=5), Ururrada bulshada(n=5), maareeyayaasha barnaamijyada qaranka iyo dajiyeyaasha siyaasadda(n=5), iyo shaqaalaha xannaanada xoolaha(n=5). Waxa kale oo aannu laba doodo-kooxeed u qabannay hay'adaha sharciga (n=5),ururrada caalamiga ah(n=5), ururrada xoolaha nool(n=5), xarumaha tacliinta sare (n=5), iyo waaxda gaarka loo leeyay.

Hay'adaha dowladda ayaa laga helay kaydad-xogeedyo jiray, oo ay ka mid yihiin tirakoobka xoolaha, dhigaallada ganacsiga sida tirada iyo noocyada xoolaha ee la dhoofiyey, qaabka daabbulka iyo isbeddellada iyo suuqyada ay tagaan. Falanqaymaha xogahan ayaa horseeday talabixinno siyaasadeed oo dhammaystiran, kuwaas oo ku salaysan natiijooyin cilmibaariseed, warbixinaha daneeyeyaasha, dhaqannada wanaagsan ee caalamiga ah, iyo baahiya iyo xaaladda u gaarka ah Soomaaliya.

Sababo la xiriira xogaha kaydsan oo helitaankoodu xaddidan yahay, ayaa sida oo kale nagu xanbaaray in aannu dooranno adeegsiga hab-cilmibaariseedka lagu dhex milmayo bulshada (validation approach), annaga oo si saaxiibtinimo leh u dhexgallay kooxo kala duwan oo ah daneeyayaasha xoolaha. Tan waxa loo adeegsaday in la dhugto goldaloolooyinka iyo caqabadaha ku xeeran waxsoosaarka xoolaha, waxaana looga gollahaa in lagu xoojiyo ka salgaaridda hubinta xogta, annaga oo ku ladhnay aragtiyo kale oo aannu ka helnay saraakiisha xannaanada xoolaha, dhakhaatiirta xoolaha, khuburada caafimaadka bulshada, aqoonyahanka, sida oo kale na waxa aannu qabannay doodo ku saabsan xaaladda ay hadda marayso dhoofinta iyo soodejinta xooluhu. Daraasaddan ayay muhiimaddeeda kowaad ahayd in diiradda lagu saaro qiimaynta shuruucda, siyaasadaha iyo hagayaasha arrimaha xoolaha. Qaybta habka kumilmidda (validation approach), ayaa loogu kuurgalay caqabadaha iyo goldaloolooyinka ka dhex jira caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha, taas oo ay weheliso muhiimadda hirgalinta caymisku.

Karingaabooyinka(limitation) daraasaddan waxaa ka mid ahaa muddada cilmibaarista oo gaabnayd, khibradda iyo xogaha oo koobnaa, kuwaas oo ay weheliso digniin taxadar oo ay bixiyeen saraakiisha dowladdu. Haddaba si loo yareeyo caqabadahaas, waxa aannu goobaha xog-ururinta ka hawlgalinnay cilmibaareyaal deegaanka ah, kuwaas oo aqoon durugsan u leh xaaladda deegaanka, dabciga cilmibaarista iyo dhaqanka bulshada deegaanka.

# 4. Ilaalinta Anshaxa

Ka hor intii aan waraysiga laga qaadin, waxa ay cilmibaarayaashu ogolaansho buuxa ka heleen dhammaan kaqaybgalayaasha daraaasadda, iyada oo la kala dooransiiyay in ay markasta xor u yihiin in ay joojiyaan waraysiga iyo in kale. Kaqaybgalayaashu waxa ay ahaayeen dad waaweyn oo ay ka go'do ogolaanshaha kaqaybgalkoodu. Sida oo kale, maamullada dowladda ee ay qusayso, ayaa lagu wargaliyay waxa ay ku saabsan tahay cilmibaaristu.

# 5. Natiijooyinka iyo Gorfaynta

## Waxsoosaarka Xoolaha


*"Cilmibaaristayadu waxa ay muujisay in waxsoosaarka xooluhu udubdhexaad weli u yahay dhaqdhaqaaqyada dhaqaalaha Soomaaliya, oo uu celcelis ahaan waxsoosaarka guud ee dalka ka yahay 50%, islamarkaana uu dakhliga dhoofinta ka yahay in ka badan 80%*

Cilmibaaristayadu waxa ay muujisay in waxsoosaarka xooluhu udubdhexaad weli u yahay dhaqdhaqaaqyada dhaqaalaha Soomaaliya, oo uu celcelis ahaan waxsoosaarka guud ee dalka ka yahay 50%, islamarkaana uu dakhliga dhoofinta ka yahay in ka badan 80%. Xogo sugan ayaa muujinaya in 55% Soomaalidu tahay xooladhaqato reerguuraa ah, iyada oo ay 80% ku hawllan yihiin dhaqashada meesiyada kala duwan ee xoolaha.

Si kastaba ha ahaatee, sababo la xidhiidha tirakoob la'aanta dhowaanahan, oo ay uga sii dareen isbeddelka cimilada, xasiloonidarrada shacabka, kor u kaca barakacayaasha gudaha (IDPs) iyo magaalo galka reermiyiga, ayaa hubanti la'aan ka dhigaya runnimada tirooyinkan.


Inkasta oo ay jiraan caqabado joogto ah oo la xiriira colaadaha dabadheeraaday, amnidarrada, carqaladaha deegaanka, haddana xoolaha ayaa ku suntan heer adkaysin oo yaab leh. Adkaysigan waxa daliil u ah meesiyada kala duwan ee xoolaha, sida ku cad jaantuska1-aad. Tirooyinka faraha badan ee ka jooga meesiyada xoolaha Soomaalidu dhaqato, ayaa hoosta ka xarriiqaya muhiimadda ay xooluhu u leeyihiin habnololeedka iyo dhaqaalaha Soomaaliya. Inkasta oo ay dhibaatooyin badani soo foodsaareen, haddana xooladhaqatadu waxa ay weli haystaan oo ay daryeelkooda ku guntadeen xoolo aad u tiro badan, taas oo muujinaysa la qabsashada iyo u dhabar-adayga xaaladda deegaanka ee murugsan.[12]

12. Ncube, N. Q. O. B. I. L. E. (2019). Measuring resilience in Somalia: an empirical approach. University of South Africa.




**Jaantuska 1: Tirada Meesiyada Xoolaha (Tixraac: Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, 5tii Feebaraayo 2023).**

Sida ay falanqayntayadu xaqiijinayso, hilibka ka yimaadda xooladhaqatada reerguuraaga ah ayaa lagu tiriyaa qaybta ugu badan hilibka la cuno, iyada oo lagu kala qiyaaso: hilibka geela 40%, hilibka riyaha 30%, hilibka lo'da 20% iyo hilibka idaha 10% (Jaantuska 2). Tirooyinkan ayaa muujinaya doorka lixaadka leh ee ay xooladhaqatadu ka qaadato buuxinta baahiyaha cuntooyinka booratiinka leh ee bulshadu cunto iyo kaalmaynta haqabbeelka guud ee cuntada. Cilmibaaristayada ayaa sida oo kale shaacisay in xaaladhaqato-beeralaydu door weyn ka qaataan waxsoosaarka hilibka iyo dakhli abuurka qoysaska Soomaalida. Celcelis ahaan, bulshada xooladhaqato-beeralayda ayaa xoolahooda lagu qiyaasaa, 12% lo' ah, 15% riyo ah iyo 7% ido ah. (Jaantuska 2). Xooladhaqatada reerguuraaga iyo xeeladhaqato-beeralayda ayaa dakhliga qoysaska Soomaaliyeed ka daboola inta u dhexaysa 10% illaa 50%, taas oo muujinaysa muhiimadda ay u leeyihiin taageerada nolol-maalmeedka iyo xasiloonida dhaqaalaha reer miyiga. (Jaantuska 2).





**Jaantuska 2: Waxsoosaarka Hilibka Dalka (Tixraaca: Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, 5tii Feebaraayo 2023).**

Beeraha ku baxa roobka ayaa ku badan gobollada koofureed, halka meelo ka mid ah beeraha ku yaalla dhulka waraabka leh ee ku teedsan webiyada Shabeelle iyo Jubba waxsoosaarkooda looga faa'iidaysto biyaha webiyada.[13] Si kastaba ha ahaatee, beeraha ku tiirsan waraabka roobka ayaa ah kuwo u nugul isbeddelka cimilada, taas oo muujinaysa baahida loo qabo hab-dhaqan wax beerasho oo adkaysin leh iyo istaraatiijiyado lagu maamulo waraabka beeraha.[14]

> *"Maadaama ay xuddun u tahay dhoofinta xoolaha nool, Soomaaliya waxa ay dhoofisay in ka badan shan milyan oo neef sannadkii 2015, kuwaas oo ka dhoofay dekedaha istaraatiijiga ah ee Berbera, Boosaaso iyo Muqdisho. (Jaantuska 3)*

Dhibaatooyinka soo jireenka ah ee la xiriira arrimaha xooladhaqatada, barakaca bulshooyinka, iyo caqabadaha ku salaysan adeegyada caafimaadka xoolaha, ayaa dhammaantood si isku sidkan uga qaybqaatay isbeddellada xaddiga xoolaha. Maadaama ay xuddun u tahay dhoofinta xoolaha nool, Soomaaliya waxa ay dhoofisay in ka badan shan milyan oo neef sannadkii 2015, kuwaas oo ka dhoofay dekedaha istaraatiijiga ah ee Berbera, Boosaaso iyo Muqdisho. (Jaantuska 3).  Tirada xoolihii Soomaaliya laga dhoofiyay intii u dhexaysay sannadihii 2012-2022, oo la meesiyeeyay ayaa ku muujisan Jaantuska 3. Xoolaha ay Soomaaliya dhoofiso ayaa ka dega Bariga Dhexe, kuwaas oo ugu badan xilliyada Xajka. Dhaqaalaha adag ee ka soo xerooda xoolaha Soomaaliya dhoofiso, ayaa sannadkii 2015 lagu qiyaasay $360 milyan oo doollar, taas oo muujinaysa muhiimadda ay waaxda xooluhu u leedahay dhaqaalaha Soomaaliya iyo habnololeedka dadkeeda.




**Jaantuska 3: Tirada xooliihii ay Soomaaliya dhoofisay sannadihii 2012-2022 (Tixraac: Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, Soomaaliya)**

Tobannaan sanaba, xooladhaqatadu waxa ay ku hawllanaayeen in ay ka falceliyaan saamaynta taban ee ku timaadda noocyada khayraadka deegaanka, oo ay ugu horreeyaan in xooluhu u daaqaan si tan-dhaaf ah iyo in la buuxdhaafiyo xerooyinka xoolaha. Waxa saamayntaas uga sii daray masiibooyinka cimilada ee ay ka midka yihiin abaaraha soo noqnoqda, isdhalanrogga cudurrada faafa, khilaafaadka, xasiloonidarrada siyaasadda gobolka, awoodda dowladda ee liitada, caqabadaha ganacsiga ee caalamiga ah, maqnaanta nidaamyada horumarka iyo siyaasadda la xidhiidha xooladhaqatada reerguuraaga ah.

13. Rees, D. J., Omar, A. M., & Rodol, O. (1991). Implications of the rainfall climate of southern Somalia for semi-mechanized rain-fed crop production. Agricultural and forest meteorology, 56(1-2), 21-33.
14. Olayide, O. E., & Alabi, T. (2018). Between rainfall and food poverty: Assessing vulnerability to climate change in an agricultural economy. Journal of Cleaner Production, 198, 1-10.

Si wax looga qabto caqabadaha murugsan ee soo foodsaaray xooladhaqatada Soomaaliya, waxa loo baahan yahay iskaashi iyo xalal wax ku ool ah, si loo kobciyo adkaysiga iyo waaritaanka habnololeedka xooladhaqatada, oo ay weheliso waxkabeddelka deegaanka, dhaqan-dhaqaalaha iyo gedgeddoonka siyaasadda. In ay bulshooyinka xooladhaqatada ahi yeeshaan awood ay kaga qaybqalaan hannaanka go'aan-gaadhista ayaa muhiim u ah kobcinta  iyo udhammaanshaha xoolaha, taas oo u gogolxaaraysa in Soomaaliya gaarto horumar waara.[15]

## Ganacsiga Xoolaha

Ganacsiga xoolaha waxa ku gadaaman goldaloolooyin iyo caqabado tiro badan oo murugsan, kuwaas oo u baahan fiiro degdeg ah iyo faragalin buuxda. Caqabadaha ugu waaweyn waxa ka mid ah arrimaha la xiriira waxsoosaarka iyo fursadaha, caqabadaha farsamada, dabarrada juquraafiyadda, iyo kaabayaal la'aanta (Shaxanka 1).

### Shaxanka 1: Caqabaha haysta ganacsiga xooladhaqatada Soomaalida

| Natiijooyinka Muhiimka ah | Sharraxaad |
|---|---|
| **Waxsoosaarka** | Ku tiirsanaanta xooladhaqatada ayaa keentay in uu waxsoosaarka caanuhu noqdo mid aan fadhiyin, gaar ahaan xilliyada roob yaraanta. Sababo la xiriira taageero la'aanta dowladda ayaa iyaduna keentay in aanu waxsoosaarka digaaggu ka jirin miyiga iyo magaalo toonna. |
| **Dhibaatooyinka Fursadda** | Fursadaha suuqa waxa wiiqay hababka kaabayaasha iyo jidadka isu socodka oo ah kuwo liita. |
| **Dabarrada farsamada** | Yaraanta adeegyada farsamada, ayaa ka qaybqaata in uu waxsoosaarku isbeddelo/x-umaado xilliyada safarka, gaar ahaan caanaha. |
| **Caqabadaha juquraafiyadda** | Masaafada fog ee u dhexaysa bulshooyinka xooladhaqatada ah iyo suuqa xoolaha ayaa sabab u ah caqabadaha saadka/lojistikada iyo korodhka qarashaadka. |
| **Abaaraha** | Abaaraha soo noqnoqda ayaa u sabab ah kororka dhimashada xoolaha iyo isdhimidda waxsoosaarka xoolaha, taas oo burbur dhaqaale u horseedday qoysaska xooladhaqatada ah ee noloshoodu dheef iyo dhuuniba ku tiirsan tahay xoolahooda. Biyo la'aanta iyo xaalufka ayaa xooladhaqatada ku sandulleeya in ay u hayaamaan goobta biyo iyo baad ugu dhow, taas oo inta badan dhalisa colaado iyo barakac. |
| **Koobnaanta kaabayaasha** | Waxba laguma kordhin nidaamka ganacsiga xoolaha, ee waa laga ganacsadaa uun, waxaana caqabadaha haysta ka mid ah la'aanta waddooyinka gaadiidka, qaboojiyeyaasha, iyo adeegyada farsamada. |

Caqabadaha asaasiga ah, ee haysta bulshada xooladhaqatada ah waxa ka mid gedgeddoonka waxsoosaarka caanaha. Ku tiirsanaanta jaadadka cimilada, sida xilliyada roobku yar yahay oo ay dhacdo in ay kala go'aan waxsoosaarka xooluhu, taas oo saamayn xooggan ku yeelata daboolidda baahiyaha suuqa ee isbedbeddela.[16]

15. Barasa-Mang'eni, E. (2014). Peace and Conflict Impact Assessment in Somalia: Opportunities for empowerment of ethnic minorities. Journal of Peacebuilding & Development, 9(1), 59-73.
16. Ogallo, L. A., Omondi, P., Ouma, G., & Wayumba, G. (2018). Climate change projections and the associated potential impacts for Somalia.

Abaaraha soo noqnoqda ayaa u sabab ah kororka dhimashada xoolaha iyo isdhimista waxsoosaarka xoolaha, taas oo burbur dhaqaale u horseedday qoysaska xooladhaqatada ah ee noloshoodu dheef iyo dhuuniba ku tiirsan tahay xoolahooda.[17] Biyo la'aanta iyo xaalufka ayaa xooladhaqatada ku sandulleeya in ay u hayaamaan goobta bur iyo biyo ugu dhow, taas oo inta badan dhalisa colaado iyo barakac.[18]

Caqabadaha kale ee waxsoosaarka haysta waxa ka mid ah suququlka caanaha iyo digaagga, kuwaas oo ay caadiyan sabab u tahay xaddidnaanta taageerada dowladdu siiso. Ganacsiyadan oo waayay taageero kaabta oo wax ku ool ah, ayaa la hagaasay caqabado curyaamiyay kobacooda iyo waaritaankooda, kuwaas oo halis ku ah ballaarinta ganacsiga xoolaha.

> *In kasta oo ay Soomaaliya isku filnaansho ka gaartay dhanka waxsoosaarka xoolaha, haddana waxa ay u muuqataa in ay si weyn ugu tiirsan tahay waxsoosaarka digaagga oo ay la soo degto*

In kasta oo ay Soomaaliya isku filnaansho ka gaartay dhanka waxsoosaarka xoolaha, haddana waxa ay u muuqataa in ay si weyn ugu tiirsan tahay waxsoosaarka digaagga oo ay la soo degto, taas oo muujinaysa isu-dheellitir la'aanta ganacsiga, oo ay lama huraan tahay in fiiro gaar ah loo yeeshaa. Nuglaanta noocan oo kale ah ee ku tiirsanaanta suuqa caalamiga ah ayaa muujinaya baahida loo qabo istaraatiijiyado ganacsi oo baahsan isla markaana adkeysi badan.

Liidashada Fursadaha suuqa waxa ka qaybqaata caqabadaha kaabayaasha dhaqaale oo xaddidan iyo jidadka gaadiidka oo kooban, kuwaas oo lafdhuungashay ku noqday habsamisocodka waxsoosaarka xoolaha ee dalka gudihiisa iyo ganacsiga caalamiga ah-labadaba. Kala durugsanaanta suuqa iyo deegaannada bulshooyinka xooladhaqatada ah, waxa uga sii daray farsamooyinka saadka/loojistikada oo murugsan, taas oo horseedday korukaca kharashaadka, isla markaana carqaladaysay hanashada fursadaha suuqa.[19]

> *Yaraanta adeegyada farsamada waxsoosaarka xoolaha, gaar ahaan caanaha, ayaa qayb ka ah in ay xumaadaan inta la soo safarinayo*

Caqabaha jira waxa sii labajibaara fursadaha qalabka farsamada oo suququl ah. Yaraanta adeegyada farsamada waxsoosaarka xoolaha, gaar ahaan caanaha, ayaa qayb ka ah in ay xumaadaan inta la soo safarinayo. Tani, burbur dhaqaale oo kaliya kuma keento xooladhaqatada, balse waxa kale oo ay xaddiddaa dheefkorka waxsoosaarka ka hor inta aanu suuqa gaadhin.

Caqabadda kale ee jirta ayaa ah la'aanta heshiisyo rasmi ah oo u dhexeeya xooladhaqatada iyo shirkadaha caanaha farsameeya. In la dejiyo heshiisyo cadcad oo sugan ayaa horseedi kara koboc xasiloon oo ku dhisan xiriir ganacsi oo la saadaalin karo dheefaha uu u leeyahay dhinacyada ay qusayso.

17. Ifejika Speranza, C. (2010). Drought coping and adaptation strategies: Understanding adaptations to climate change in agro-pastoral livestock production in Makueni district, Kenya. The European Journal of Development Research, 22, 623-642.
18. Climate Change, Transhumant Pastoralism and Conflict in Somalia
19. Biénabe, E., Coronel, C., Le Coq, J. F., & Liagre, L. (2004). Linking small holder farmers to markets: Lessons learned from literature review and analytical review of selected projects.

Maqnaanta kaabayaasha ay ka midka yihiin waddooyinka gaadiidka oo kooban, adeegyada farsamada iyo qaboojiyeyaal la'aanta, ayaa sida oo kale ka qaybqaata in uu si weyn u baaho ganacsiga bilaa dheefta suuqeed ah ee xoolaha nooli. Tani ma xaddidayso oo kaliya faa'iidooyinka waxsoosaarka dhaqaalaha, laakiin waxa kale oo ay kor u qaadaysaa arrimaha la xiriira nadaafadda iyo tayada waxsoosaarka.

Isbedbeddelka qiimaha ganacsiga xoolaha ayaa horseeday caqabado kale, iyada oo la adeegsado hannaan wax kala iibsi oo ku salaysan gorgortan, halkii ay ahayd in iibku noqdo mid ku salaysan hannaanka kala miisaamashada xoolaha ee tooska ah.

Hannaanka iibka oo sii dhex mara gacmo badan ayaa sii carqaladeeya qiimaha neefka, taas oo keenta sicir-barar qiime, isla markaana saamaysa xooladhaqatada iyo xooladheefsatada- labadaba.

Intaas waxa dheer, oo iyaguna caqabadaha jira sii bullaaliya la'aanta taageero hay'adeed iyo siyaasado dowladeed oo bartilmaameedsada xoojinta suuqyada gudaha iyo kuwa dibedda ee xoolaha. Dedaallo istaraatiijiyadeed oo xidhiidhsan ayaa lafdhabar u noqon kara in la aasaaso qaabdhismeedyada muhiimka u ah in xooladhaqatada loo fududeeyo fursadaha suuqa, iyo in la kobciyo saaxadda guud ee ganacsiga.

Waxkaqabashada caqabadahan isku-raranta ah iyo goldaloolooyinka ku xeeran ganacsiga xoolaha Soomaaliya, ayaa u baahan istaraatiijiyado faragalineed iyo iskaashi sal ballaaran oo loo dhan yahay. Maaddaama ay Soomaaliya qorshaynayso abbaarteeda mustaqbalka ee ku aaddan in suuqa xooluhu ku tallaabsado koboc ganacsi oo waaritaan leh, waxa la joogaa xilligii la isu gaashaanbuuraysan lahaa dadaallada lagu xoojinayo horumarinta waaxda xoolaha.

## Dhaqdhaqaaqyada ganacsiga xoolaha ee aan rasmiga ahayn

Ganacsiga xoolaha ee aan rasmiga ahayn ayaa door lixaad leh ka ciyaara meertada macaamiisha hilibka iyo waxsoosaarka kale ee xoolaha, balse tirakoob rasmi ah laguma dersin heerka ay baaxaddiisu gaarsiisan tahay oo weli wax badan baa daahsoon.[20] Hawlwadeennada wakaaladaha xooluhu waxa ay iskaga gudbaan xuduudaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka-labadaba, iyaga oo xoolaha ka soo daabula deegaannada xooladhaqatada, islamarkaana geeya magaalooyinka Soomaaliya, Kenya iyo Itoobiya, goobahaas oo lagu cuno, ama laga sii daabulo.

20. Ng'asike, P. O. A., Stepputat, F., & Njoka, J. T. (2020). Livestock trade and devolution in the Somali-Kenya transboundary corridor. Pastoralism, 10, 1-14.

Caqabadaha waaweyn ee ku gadaaman dhaqdhaqaaqyada ganacsiga xoolaha ee aan rasmiga ahayn, waxa iyaga oo la mawduuceeyay lagu soo koobay Jaantuska 4. Natiijadayada waxa ay muujinaysaa in maamulka iyo shuruucda ganacsigu yihiin kuwo murugsan, oo ay sababeen xuduudaha maamulka, kala duwanaanta siyaasadda iyo qaabdhismeedyada sharciga xoolaha quseeya. Hannaankan ayaa waxa sii cakiray xiriirka ka dhexeeya shuruucda dawladda ee rasmiga ah iyo nidaamyada ku dhisan kalsoonida qabiilka.[21] Xooluhu inta ay safarka yihiin waxa ay sii dhex maraan shabakado kalsooni ku salaysan, kuwaas ka shaqeeya isku xidhka dhinacyada, dhexdhexaadinta khilaafaadka, macluumaadka iyo in xooluhu helaan amni, biyo, cows, iyo aqoonsi, waana shabakado muhiim u ah dhaqdhaqaaqyada ganacsiga xoolaha.

> *Waxa dhicisoobay, shirar saddex-geesood ahaa oo ay Soomaaliya la yeelatay Kenya iyo Itoobiya, kaas oo ay ahayd in uu xalliyo caqabadaha haysta ganacsiga xuduudaha ka gudba, waxaana ka mid ahaa barnaamijka xakamaynta cudurrdada*


Soohdimaha dowladaha xubnaha ka ah faderaalka ayay ka yimaaddaan isku dhacyo ku salaysan dhulka iyo daaqa, kuwaas oo xanniba jidadka ganacsiga, islamarkaana kor u qaada culaysyada cashuuraha.[22] Inta badan khayraadka dowlad-goboleedyadu waa mid xaddidan, waxaanay halgan ugu jiraan horumarinta shuruucda ganacsiga, khaabayaasha suuqa iyo adeegyada xannaanada xoolaha. Waxa dhicisoobay, shirar saddex-geesood ahaa oo ay Soomaaliya la yeelatay Kenya iyo Itoobiya, kaas oo ay ahayd in uu xalliyo caqabadaha haysta ganacsiga xuduudaha ka gudba, waxaana ka mid ahaa barnaamijka xakamaynta cudurrdada.

Ganacsatada xoolaha ayaa sheegtay in ay la dhibban yihiin kaabayaasha waddooyinka oo aad u liita, jidgooyooyinka kooxaha aan dowliga ahayn, lacagaha aan sharciyaysnayn ee ay ka qaadaan kooxaha aan dawliga ahayni, iyo la'aanta hoggaamiye dowladeed oo dedaal ku bixiya gurmadka abaaraha, oo u gargaara xooladhaqatada, islamarkaana taakuleeya ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe.

Waxa kale oo ay natiijooyinkayagu shaaciyeen in aanay wadashaqayn lahayn maamullada heer qaran iyo kuwa heer dawlad-goboleed, iyo in aanay jirin wadashaqeyn ka dhaxaysa ururrada maxaliga ah sida wakaaladaha xoolaha.

Sidaa darteed, samaynta nidaamyada xannaanada xoolaha iyo xakamaynta fayadhowrka ayaa fure u ah taageerada waaritaanka  iyo hufnaanta ganacsiga xoolaha ee ka gudba xuduudaha.

21. Ssereo, F. (2003). Clanpolitics, clan-democracy and conflict regulation in Africa: The experience of Somalia. The Global Review of Ethnopolitics, 2(3-4), 25-40.
22. Ali, A. Y. S., Dahir, A. H., & Hersi, Z. D. (2019). Federalism in post-conflict states: Assessing Somalia's challenges and the way forward. Perspectives on Federalism, 11(2), 4.




**Jaantuska 4: Goldaloolooyinka dhaqdhaqaaqyada ganacsiga xoolaha ee aan rasmiga ahayn, ee ka jira Soomaaliya**

## Muhiimadda Dekedaha Soomaaliya

Falanqayntayadu waxa ay shaacisay afar dekedood oo muddo tobannaan sano ah lafdhabar u ahaa qaabaynta dhaqdhaqaaqyada ganacsiga xoolaha Soomaaliya, kuwaas oo kala ah dekadaha Muqdisho, Berbera, Boosaaso iyo Kismaayo. Dekedahani waxa ay xuddun u yihiin ganacsiga xoolaha Soomaaliya, iyaga oo ay soo foodsaareen xaalado dhaqaale oo kala duwani, kuwaas oo ay saamayn ku yeesheen awoodaha ku loollamaya gudaha iyo xidhiidhada murugsan ee ay kala kulmeen dalalka jaarka ah sida Itoobiya iyo Kenya, iyo sida oo kale dalalka Gacanka. Goldaloolooyinka iyo caqabadaha ku gadaaman dekadaha xuddunta u ah ganacsiga xoolaha, waxa si weyn u soo koobay oo lagu muujiyay (Shaxanka 3).

Sida oo kale falanqayntayadu waxa ay muujisay isbedbeddel dhaqaale oo kala duwan, caqabado ku xeeran maalgashiga caalamiga ah iyo isbeddello gobol oo yagleel ah. Muqdisho waxa ay muujisay xasilooni dhab ah, laakiin tartanno ayay la kowsatay iyada oo aan weli si fiican u saldhigan.

Berbera ayaa ku tallaabsatay isbeddelo waaweyn, iyada oo halgan weyn u gashay soo jiidashada ganacsiga caalamiga ah, taas oo saamayn ku yeelatay horumarkeeda. Dhaqaalaha Boosaaso, waxa saameeyay isbeddello ka dhashay loollan dhanka awoodda ah, taas oo xaddidday xiisaha maalgashatada, sida oo kale na Daciifisey kaabayaasha ganacsiga. Kismaayo ayaa iyaduna soo martay xasiloonidarro dhaqaale iyo mid siyaasadeed, iyo maalgalinta kaabayaasha oo liidata iyo weliba sida loo danaynayo  oo xaddidan, taas oo keentay in ganacsigu noqdo mid hubanti la'aan ah, oo ay haliso kala kulmaan ganacsatadu.

### Shaxanka 2: Goldaloolooyinka iyo caqabadaha ka jira dekedaha ganacsiga xoolaha ee Soomaaliya

| Dekedda | Isbeddellada Dhaqaaale | Maqnaanta Maalgashiyo Caalami ah | Heerka Dhismaha |
|---|---|---|---|
| **Muqdisho** | Caadi ahaan waa kuwo xasiloon, marka la barbardhigo kuwa kale | Waxa ay soo jiidatay maalgashiyo caalami ah, balse waxa ay soo martay halgan  adag | Si fiican baa loo dhisay |
| **Berbera** | Isbeddello waaweyn | Waxa ay soojiidatay maalgashiyo caalami ah, waxaanay soo martay halgan adag | Horumar baa ka jira, waxa se ku xeeran caqabado tartan oo laga yaabo in ay keeneen tartamayaasha maxalliga ahi |
| **Boosaaso** | Isbeddellada dhaqaalaha waxa saamayn ku yeeshay loollanka awoodaha | Danayn yaraan | Ma laha nidaam ganacsi oo adag. |
| **Kismaayo** | Xasiloonidarro | Maalgalinta kaabayaasha oo aan ku fillayn, maalgalinta oo xaddidan iyo danaynta oo liidata | Ku filnaansho la'aan, ayaa saamyasa waxtarka ganacsiga. |

Goldaloolooyin kale oo waaweyn ayaa lagu soo koobay Shaxanka 4. Waxaana ka mid ah kaabayaasha oo aan kufilnayn, xarumaha karantiimada oo aad u yar, maalgashiga iyo maalgalinta oo xaddidan, caqabado la xiriira fursadaha suuqa, dhibaatooyinka shahaadada iyo heerarka tayada, arrimaha amniga, caqabado la xiriira wadashaqaynta dowladda, saamaynta isbeddelka cimilada, laqabsiga tignoolajiyadda oo xaddidan iyo baahiyaha dhisidda muruqa iyo maanka xooladhaqatada. Waxkaqabashada goldaloolooyinkan ayaa u baahan dadaallo ballaaran iyo iskaashi xooggan oo ay ku lug leeyihiin daneeyayaashu, si loo wanaajiyo kaabayaasha,loo horumariyo qaabdhismeedyada sharciga, korna loogu qaado waaritaanka iyo adkaysiga dhaqannada ganacsiga xoolaha.

**Shaxanka 3: Caqabadaha ka jira Dekedaha Ganacsiga Xoolaha nool**

| Goobaha dhibaataysan | Caqabadaha Gaarka ah |
|---|---|
| **La'aanta kaabayaasha** | Waddooyinka oo xaddidan ama six un loo dhisay |
| **Xarumaha karantiimada** | Dekedaha muhiimka ah oo aan lahayn xarumo si fiican u qalabaysan, ayaa kordhinaya halista xanuunnada |
| **Maalgashiga iyo maalgalinta** | Maalgashiga oo xaddidan<br>Hawlgallada oo aan lagu bixin maalgalin ku filnayn |
| **Fursahada Suuqa** | Caqabadaha ka jira helitaanka suuqyada caalamiga ah<br>Xaddidnaanta suuqyada wax loo dhooofiyo |
| **Shahaadada iyo heerarka tayada** | Nidaamyada shahaadada bixiya oo aan si iswaafaqsan u hirgalin<br>U hoggaansanaanta heerarka caalamiga ah oo liita |
| **Arrimaha Amniga** | Habsanisocodka ganacsiga, waxa carqaladeeyay caqabadaha la xiriira amni darrada iyo xasaradaha joogtada ah |
| **Iskudubbaridka Dowladda** | Hay'adaha sharciga, oo aan isugu dubbarridnayn si wax ku ool ah |
| **Saamaynta isbeddelka Cimilada** | U nugaylka isbeddelka cimilada, ayaa saameeyay biyaha iyo daaqa |
| **Laqabsiga tignoolajiyadda** | Laqabsiga tignoolajiyadda casriga ah oo xaddidan |
| **Awood dhisidda** | Barnaamijyada tababarka oo suququl ah |
| **Xasiloonidarrada sharciga iyo siyaasadda** | Xasiloonidarrada siyaasadda ayaa abuurta jawi aan la saadaalin karin |

## Qiimaynta Qaabdhismeedka Xeer-dajinta iyo Shuruucda Caafimaadka Xoolaha

Wasaraadda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, ee federaalka ayaa xuddun u ah arrimaha maamulka iyo kormeerka barnaamijyada iyo siyaasadaha caafimaadka xoolaha dalka. Hay'addani waxa ay gacan weyn ka gaysatay samaynta iyo fulinta xeerarka iyo adeegyada xannaanada xoolaha, kuwaas oo lafdhabar u ah xoolaha (Shaxanka 5). Laanta Caafimaadka Xayawaanka ayaa masuul ka ah kormeerka xakamaynta xanuunnada, sahaminta, iyo fulinta awaamiirta lagu hubinayo caafimaadka xoolaha dalka oo dhan. Shaxanka 5-aad ayaa lagu soo koobay shuruucda, siyaasadaha, iyo habraacyada maamulka caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha. Ururro kale oo caalami ah, ayaa door wanaagsan ka qaatay samaynta heerarka iyo hagayaasha caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha, waxaana lagu muujiyay Shaxanka S1, oo ku yaalla dhammaadka warqaddan.

Baaritaankayagu waxa uu shaaciyay goldaloolo weyn oo ka jirta xeerarka iyo shuruucda xoolaha sida Xeerarka Ilaalinta Caafimaadka Xayawaanka, Barnaamijka Shahaadada Caafimaadka Xoolaha ee Qaranka iyo Heerarka Daryeelka Xayawaanka iyo Hagayaasha Safarka Xoolaha ee Dhulka. Kuwan maqnaantoodu waxa ay muujinaysaa in aanay jirin shuruuc ku filan daryeelka iyo ilaalinta caafimaadka xayawaanka.[23]

23. Bayne, K., Howard, B. R., Kurosawa, T. M., & Nájera, M. E. A. (2021). An Overview of Global Legislation, Regulations, and Policies. Handbook of Laboratory Animal Science, 899-922.

Sida oo kale waxa maqan Hage-yaasha iyo mabaadiida lagama maarmaanka ah sida siyaasadaha xakamaynta cudurrada, siyaasadaha daryeelka xayawaanka, shuruucda dhoofinta iyo soodejinta (shahaadada dhoofinta iyo shuruudaha soodejinta), siyaasadaha xoolaha ee qaranka, iyo qorshayaasha horumarinta xoolaha. Tani waxa ay curyaamisay qorshaynta istiraatijiyadeed iyo dadaallada horumarineed iyo hindisayaasha lagu doonayo in si wax ku ool ah loo maareeyo cudurrada dillaaca, loona xakameeyo ganacsiga caalamiga ah ee xoolaha.[24,25]

Qiimayntayadu waxa ay daaha ka fayday in aanay jirin qaabdhismeedyo sharci, oo ay ka mid yihiin kuwa la xidhiidha Shuruucda Dhaqaalaha Bulshada Gobolka (REC) iyo ilaalinta tayada iyo shahaado bixinta, iyada oo si gaar ah xoogga loo saarayo hababka shuruucda dawooyinka iyo shahaado bixinta, si loo hubiyo in hilibka la dhoofiyaa buuxiyay shuruudaha badqabka iyo heerarka tayada.

Nafiijooyinka ayaa shaaca ka qaaday baahida degdegga ah ee loo qabo in dibuhabayn dhammaystrian lagu sameeyo qaabdhismeedyada xeer-dejinta iyo shuruucda caafimaadka xoolaha Soomaaliya. Waxkaqabashada goldaloolooyinka jira ayaa lama huraan u ah kor u qaadista caafimaadka, daryeelka iyo waaritaanka waxsoosaarka xoolaha.

Meelaha mudan in dibuhabayn lagu sameeyo waxa ka mid ah dajinta xeerarka iyo shuruucda muhiimka ah sida Xeerarka Ilaalinta Caafimaadka Xayawaankaiyo Barnaamijka Shahaadada Caafimaadka Xoolaha ee Qaranka, iyo sida oo kale aasaaska siyaasado iyo habraacyo wax ku ool ah, sida shuruucda dhoofinta iyo soodejinta (shahaadada dhoofinta iyo shuruudaha soodejinta), siyaasadaha xoolaha ee qaranka, iyo qorshayaasha horumarinta xoolaha). Waxa kale oo lagama maarmaan ah xoojinta hay'adaha sharciga iyo awoodaha fulinta. Sida oo kale, in la daboolo goldaloolooyinkaas ayaa lamahuraan u ah xoojinta adkaysiga iyo waaritaanka waxsoosaarka xoolaha.

> *“Nidaamka hadda jira ayaa muujinaya goldaloolooyin waaweyn oo ka dhex jira sharci-dejinta iyo qaabdhismeedyada shuruucda muhiimka u ah horumarinta iyo ilaalinta caafimaadka iyo daryeelka xoolaha Soomaaliya*

Nidaamka hadda jira ayaa muujinaya goldaloolooyin waaweyn oo ka dhex jira sharci-dejinta iyo qaabdhismeedyada shuruucda muhiimka u ah horumarinta iyo ilaalinta caafimaadka iyo daryeelka xoolaha Soomaaliya. Waxkaqabashada cilladahaasi waxa ay lama huraan u tahay xoojinta adkaysiga iyo waaritaanka waxsoosaarka xoolaha.

24. Bekele, A., Alemu, D., Teklewold, T., Moore, H. L., Hodge, C., & Berg, S. (2018). Strategies for animal disease control in Ethiopia: A review of policies, regulations and actors. Journal of Veterinary Medicine and Animal Health, 10(12), 256-265.
25. Scoones, I., & Wolmer, W. (2006). Livestock, disease, trade and markets: policy choices for the livestock sector in Africa.

### Shaxanka 4: Xeerar guud iyo shuruucda, siyaasadaha iyo habraacyada, xarumaha iyo hay'adaha kormeerka ee sharciga ah

| Xeerarka iyo Shuruucda | Siyaasadaha, Habraacyada, Hagayaasha iyo Mabaadiida | Hay'adaha Kormeerka ee Sharciga ah |
|---|---|---|
| Xeerka Ilaalinta Caafimaadka Xayawaanka( waxa uu maamulaa kahortagga, baadhitaanka, xakamaynta iyo dabargoynta cudurrada ku dhaca xoolaha) | Siyaasadaha xakamaynta cudurrada ( mabaadiida sahanka, barnaamijyada tallaalka iyo hababka karantiimaynta) | Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa |
| Barnaamijka Shahaadada Caafimaadka Xoolaha ee Qaranka(NVAP) (heerarka lagu qiimeeyo dhakhaatiirta xoolaha, ee ku hawllan arrimaha xoolaha ee ee dalka gudihiisa iyo kuwa caalamiga ah) | Siyaasadaha daryeelka xayawaanka (heerarka safrinta; hagayaasha daaweynta) | Maamulka caafimaadka xoolaha ee qaranka |
| Heerarka Daryeelka Xayawaanka iyo Hagayaasha Safarka Xoolaha ee Dhulka (waxa ay qorshaysaa heerarka safarka xoolaha) | Shuruucda dhoofinta iyo soodejinta (shadaahada dhoofinta; shuruudaha soodejinta) | Guddiyada ama maamullada suuqgaynta xoolaha |
| Xeerka Xakamaynta Dhoofinta Xayawaanka ee 2004 (waxa uu ilaaliyaa dhoofina xayawaanka nool). | Heshiisyada iyo heerarka caalamiga ah (Helbeegyada OIE Standards; heshiisyada Ururka Ganacsiga Adduunka( WTO) | Hay'adaha deegaanka |
| Xeerka Cudurrada Xayawaanka ee 1984(waxa uu ka hadlayaa xakamaynta iyo dabargoynta cudurrada xayawaanka) | Siyaasadaha xoolaha nool ee qaranka: (qorshayaasha horumarinta xoolaha nool; qaabdhismeedyada sharciga) | Ilaalinta Xadadka iyo Kastamyada |
| | Shuruucda Dhaqaalaha Bulshada Gobolka (iswaafajinta gobolka: heshiis u dhexeeya dalalka deriska ah si loo mideeyo habraacyada caafimada xoolaha ganacsiga ee iskaga gudba xuduudaha) | Guddiyada baarlamaanka |
| | Shahaado-bixinta iyo hubinta tayada(sharciga daawada: hagayaal qeexaya daawooyinka xoolaha nool oo la ansaxiyay iyo adeegsigooda saxda ah) Hannaanka shahaado-bixinta (shuruudaha hubinta iyo heerarka badqabka waxyaalaha hilibka laga sameeyo ee la dhoofiyo) | |

## Caymiska Xoolaha

Baaritaankayagu waxa uu si qotadheer ugu guurkalay barnaamijyada ka diyaargarowga masiibooyinka iyo dhukmentiyada sharciga iyo siyaasadaha caymiska xoolaha. Inkasta oo la garwaaqsaday muhiimadda barnaamijyada ka diyaargarowga masiibooyinka, in lagu yareeyo saamaynta halisaha ba'an sida abaaraha soo noqnoqda, haddana cilmibaaristayadu waxa ay shaacisay in aanay Soomaaliya weli hirgalinin barnaamijyadaas. Maqnaanshaha barnaamijyada ayaa xooladhaqatada Soomaalida gayaysiisay in ay u nuglaadaan raadaynta masiibooyinka dabiiciga ah, taas oo curyaamisay dadaallada kor loogu qaadayo daryeelka iyo horumarinta dhaqaalaha gobolka.

Qiimayntayadu waxa ay daaha ka rogtay goldaloolooyin laxaad leh oo la xiriirta aasaaska siyaasadda iyo sharciga maamulka caymiska xoolaha(Shaxanka 6). Gaar ahaan, waxa aannu ogaannay in aanay jirin dhukmentiyada muhiimka u ah wax ku oolnimada hirgalinta iyo ku dhaqanka qorshayaasha caymiska xoolaha. Waxa kuwaas ka mid ah xeerarka iyo shuruucda caymiska qaranka; qaabdhismeedyada caymiska beeraha; habraacyada hay'adaha sharciyaynta caymiska, hagayaasha ku saabsan caymiska waxsoosaarka xoolaha; siyaasadaha maaraynta halista; iyo isbeddelka cimilada iyo siyaasadaha maaraynta masiibooyinka.

*"la'aanta hagayaasha caymiska beeraha ee caalamiga ah, heshiisyada iskaashiga hay'adaha dowliga ah iyo kuwa gaarka ah, shuruucda caymiska-guud, barnaamjiyada taageerada dowladda iyo xeerarka anshaxa caymiska ayaa sii weheliya caqabadaha ku gadaaman caymiska xoolaha*

Si kastaba ha ahaatee, la'aanta hagayaasha caymiska beeraha ee caalamiga ah, heshiisyada iskaashiga hay'adaha dowliga ah iyo kuwa gaarka ah, shuruucda caymiska-guud, barnaamjiyada taageerada dowladda iyo xeerarka anshaxa caymiska ayaa sii weheliya caqabadaha ku gadaaman caymiska xoolaha. Maqnaanta dhukmentiyadaas asaasiga ah ayaa xannibay horumarka koboca iyo waaritaanka suuqa caymiska xoolaha, isaga oo xaddiday awoodda ay xooladhaqatadu u leedahay in ay hantideeda iyo habnololeedkooda ka difaacato halisaha ku xeeran shaqadooda. [26, 27, 28]

26. McPeak, J. G., Little, P. D., & Doss, C. R. (2011). Risk and social change in an African rural economy: livelihoods in pastoralist communities (Vol. 7). Routledge.
27. McPeak, J., Chantarat, S., & Mude, A. (2010). Explaining index-based livestock insurance to pastoralists. Agricultural Finance Review, 70(3), 333-352.
28. Fava, F. P., Nathaniel, D. J., Sina, J., Andrew, G. M., & Maher, B. (2021). Building financial resilience in pastoral communities in Africa: Lessons learned from implementing the Kenya Livestock Insurance Program (KLIP).

### Shaxanka 5: Dhukmentiyada siyaasadda iyo sharciga caymiska xoolaha

| Nooca Dhukmentiga | Qeexitaanka |
|---|---|
| **Xeerarka iyo sharciyada caymiska qaranka** | Hawlaha caymiska waxa lagu maamulaa xeerarka iyo sharciyada qaranka, sida caymiska xoolaha |
| **Qaabdhismeedyada caymiska beeraha** | Siyaasadaha ama qaabdhismeedyada ka hadlaya caymiska beeraha iyo xoolaha ee heer qaran |
| **Habraacyada hay'adaha sharciyaynta caymiska** | Hagayaasha ay bixiyaan hay'adaha sharciyaynta caymiska qaranku, ee ku saabsan caymiska beeraha iyo xoolaha |
| **Hagayaasha caymiska waxsoosaarka xoolaha** | Hagayaasha qeexaya sifooyinka, shuruudaha iyo xaaladaha caymiska waxsoosaarka xoolaha |
| **Siyaasadaha maaraynta halista** | Siyaasadaha heer qaran ama kuwa heer gobol, ee la xiriira maaraynta halista beeraha ee ku saabsan caymiska xoolaha |
| **Isbeddelka cimilada iyo siyaasadaha maaraynta masiibooyinka** | Siyaasadaha waxkaqabashada saamaynta isbeddelka cimilada iyo maaraynta masiibada, sida caymiska xoolaha |
| **Hagayaasha caymiska beeraha ee caalamiga ah** | Hagayaasha ururada caalamiga ah ee dhiirrigaliya dhaqannada wanaagsan ee caymiska beeraha iyo xoolaha |
| **Heshiisyada iskaashiga hay'adaha dowliga ah iyo kuwa gaarka ah** | Heshiisyada u dhexeeya dawladaha iyo shirkadaha caymisyada ee gaarka loo leeyahay, ee qeexaya iskaashiga bixinta caymiska xoolaha |
| **Sharciyada caymiska-guud** | Sharciyada gaarka u ah hindisayaasha caymiska-guud, kuwaas oo ay ku jiri karaan caymiska xooluhu |
| **Barnaamijyada kaalmada dowladda** | Dukumentiyada qeexaya barnaamijyada kaalmada dawladda ee caymiska xoolaha, taas oo caymiska ka dhigaysa mid u jaban beeralayda |
| **Xeerka anshaxa caymiska** | Hagayaasha anshaxa ee warshadaha-guud, kuwaas oo dhiirrigalinaya in si siman loogu dhaqmo anshaxa caymiska xoolaha |

Waxa aannu qeexnay faa'iidooyinka uu leeyahay caymiska xooluhu, waxaana ka mid ah yaraynta halista, kobcinta adkaysiga, soojiidashada maalgashiga, xasiloonida maaliyadda, helitaanka daymaha, daryeelka bulshada, iyo ilaalinta deegaanka (Shaxanka 7). Si kastaba ha ahaatee, caqabado ay ka mid yihiin awoodista qiimaha adeegga, goldaloolooyinka xogaha, halista qiimayaasha suuqyada, murugsanaanta qaabdhismeedka siyaasadda, iyo xaddidnaanta kaabayaasha, ayaa caqabad weyn ku noqday in uu si habboon u hirgalo Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaalida (Shaxanka 7).

> “*Curinta hindisayaal hal-abuur leh oo ku salaysan xalalka caymiska abaaraha sida Barnaamijka Caymiska Xoolaha, ayaa abuuraya dariiq rajo oo adkaysi leh*

Curinta hindisayaal hal-abuur leh oo ku salaysan xalalka caymiska abaaraha sida Barnaamijka Caymiska Xoolaha, ayaa abuuraya dariiq rajo oo adkaysi leh.  Si kastaba ha ahaatee, in lagu guulaysto hirgalinta Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaalida ayaa u baahan dadaallo ay ku midaysan yihiin daneeyayaal tiro badani, oo ay ku jiraan ururrada caalamiga ah, hay'adaha gudaha iyo saaxiibada gaarka loo leeyahay.

Maqnaanshaha qaabdhismeedyo sharci iyo kuwo siyaasadeed oo dhammaystiran ayaa caqabad weyn ku noqday aasaaska iyo meelmarinta caymiska xoolaha.  Si wax looga qabto goldaloolooyinkan, waxa loo baahan yahay dadaallo laga baaraan degay si loo dejiyo, loona hirgaliyo siyaasado iyo shuruuc toolmoon, kuwaas oo dardargalinaya kobcinta suuqa caymiska xoolaha. Waxa kuwaas ka mid ah dajinta xeerar qaran iyo shuruuc u gaar ah caymiska xoolaha, samaynta qaabdhismeedyo ku salaysan caymiska beeraha oo la jaanqaadaya xaaladda Soomaaliya, iyo in ay hay'adaha sharciyaynta caymisku abuuraan hagayaal lagu maamulayo hawlgallada caymiska xoolaha.

> “*Maalgelinta tallaabooyinka falcelinta degdegga ah iyo heerarka adkaysiga, ballaarinta dheefaha maaliyadeed ee la filayo, iyo kobcinta iskaashiga, ayay Soomaaliya kaga gudbi kartaa caqabadaha ka dhasha abaaraha soo noqnoqda, waxaanay xooladhaqatadeeda u dhisi kartaa mustaqbal adkaysin leh*

Maqnaanshaha barnaamijyada ka diyaargarowga masiibooyinka iyo la'aanta dhukmentiyada siyaasadda iyo sharciga ayaa caqabado waaweyn ku noqday in caymiska xooluhu ka hanaqaado Soomaaliya. Waxkaqabashada goldaloolooyinka siyaasadda iyo hirgalinta barnaamijyada caymiskaa xoolaha ayaa lafdhabar u ah tallaabooyinka loo qaadayo taabbagalinta adkaysiga. Soosaarista Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaalida iyo midaynta dadaallada daneeyayaasha ayaa muhiim u ah ilaalinta hantida ama dhaqaalaha bulshooyinka nugul iyo la jaanqaadista dadaallada caalamiga ah si loo xoojiyo waaritaanka xoolaha. Maalgelinta tallaabooyinka falcelinta degdegga ah iyo heerarka adkaysiga, ballaarinta dheefaha maaliyadeed ee la filayo, iyo kobcinta iskaashiga, ayay Soomaaliya kaga gudbi kartaa caqabadaha ka dhasha abaaraha soo noqnoqda, waxaanay xooladhaqatadeeda u dhisi kartaa mustaqbal adkaysin leh.

### Shaxanka 6: Faa'iidooyinka iyo Caqabadaha Caymiska Waxsoosaarka Xoolaha

| Faa'iidooyinka | Caqabadaha |
|---|---|
| Yaraynta halista: ayaa difaac u noqonaysa dhaqaalaha ay dhacdooyinku galaaftaan, sida abaaraha, cudurrada iyo/ama masiibooyinka dabiiciga ah. | Awoodda dhaqaale: Heerarka qiimaha ayaa xaddidi kara fursadda ay caymiska ku gali karaan beeralay-da iyo xooladhaqatada haynta yari. |
| Kobcinta adkaysiga: kor u qaadista adkaysiga bulshooyinka ku tiirsan xoolaha, iyada oo la yaraynayo halisaha dhaqaalaha ku yimaadda dharaaraha dhacdooyinka cakiran. | Moogganaanta xogta: La'aanta xogo sax ah oo ku saabsan tirada xoolaha, caafimaadkooda, iyo qiimaha ayaa caqabad ku noqon karta qiimeynta halista qiimayaasha suuqyada xoolaha |
| Dhiirrigelinta maalgashiga: Haddii ay hagaagaan dhaqannada maarayntu, oo ay beeralaydu ogaadaan in khasaaraha masiibooyinka lagu yaraynayo kaabista caymiska, waxa ay ku dhiirranayaan maalgashiga beeraha | Halisaha isqardhaafka qiimayaasha: Suuragalnima-da isku dheelitir la'aanta kaabista caymiska iyo khasaaraha dhabta ah, ayaa horseedaysa isqard-haafka qarashaadka saxda ah. |
| Xasiloonida maaliyadda:Waxa ay abuurtaa shabakadda badbaadinta maaliyadda, iyada oo yaraysa in beeralaydu u nuglaato isbedbedellada degdegga ah ee ku yimaadda dakhliga xooladhaqatada, marka ay xooluhu ka baxaan | Qaabdhismeedka murugsan ee siyaasadda: Siyaasadaha murugsan ee caymiska, ayaa keeni kara caqabado ku salaysan fahanka iyo in beera-laydu uga faa'iidaystaan si waxtar leh |
| Helitaanka daymaha: Waxa ay fududaysaa helitaanka daymaha maadaama beeralayda caymiska ku jirta ay hay'adaha maalgalintu u arkaan daymayn-qaatayaal khatartoodu hoosayso | Caqabadaha kaabayaasha iyo Saadka/loojistikada: koobnaanta kaabayaasha ayaa xannibi kara hir-galinta wax ku oolka ah iyo barnaamijyada maamul-ka caymiska |
| Daryeelka Bulshada: Waxa ay kor u qaaddaa daryeelka bulshada, iyada oo laga hortagayo dhaqaale burburka baaxadda leh ka dhasha dhacdooyinka masiibada leh | Hubinti la'aanta isbeddelka Cimilada: Isbedbeddel-ka noocyada cimilada ayaa caqabado ku keena in si sax ah wax loo baaro iyo qiimo-dhaca la xiriira caymiska xoolaha. |
| Taageerada dowladda: Hindisayaasha dowladda ayaa jid u noqon kara dadaallada yaraynta saboolnimada iyo horumarinta beeraha | Xaddidnaanta macaamiisha waxsoosaarka: In hal-shay looga cabbir qaato- dhammaan wax-soosaarrada caymiska, laguma xallin karo baahiya-ha kala duwan ee ay qabaan xooladhaqatada kala nooca ahi |
| Horumarinta suuqa: waxa ay kobcisaa horumarka suuqyada caymiska, iyada oo soo jiidata in ay caymisleydu ballaadhiyaan adeegyada waaxaha beeraha | Dibudhacyada dalabaadka habraacyada caymiska: Habraacyada dalabaadka xafiisyada, oo muddo dheer qaata, ayaa caqabad ku noqday in beeralay-dii waxyeellowday wakhitigii loo muddeeyay ku bixiyaan maalgalintii la daymiyay |
| Ilaalinta deegaanka: Waxa ay dhiirrigalisaa in wax loo beerto si waaritaan leh, iyada oo beeralayda laga kaalmaynayo helitaanka habraacyo abuuraya saaxiibtinimo deegaan oo ay ku badbaadayaan | Dhibaatooyinka dhowrista xogta: Ururinta iyo adeegsiga xogaha shaqsiga iyo kuwa beerta ayaa kor u qaadi kara dhibaatooyinka la xiriira amniga iyo dhowrsanaan beeralayda |

## Soojeedinta Caymiska Xoolaha

Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya, waxa uu noqon lahaa hal-abuur hindise oo bilow ah, kaas oo looga golleeyahay in wax lagaga qabto xallinta dhibaatada calaf yaraanta ee ka jirta gobollada oommanaha ah iyo kuwa oommane-xigeenka ah. Isaga oo ka faa'iidaysanaya adeegsiga awoodda qiimo taabbagal ah iyo macluumaadka laga helo dayaxgacmeedyada fakaagga sare, gaar ahaan Cabirka Caadi-ahaanshaha Kaladuwanaanta Dhirta (NDVI), waa in uu Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya wax ka baddelaa adkaysiga bulshooyinka xooladhaqatada ah, oo ay soo food saaraan xaalado cimilo oo lama filaan ahi.


Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya waa in uu ku tiirsanaadaa xarunta Cabbirka Caadi-ahaanshaha Kala-duwanaanshaha Dhirta(NDVI), maadaama ay tahay xarun darista xaaladaha dhirta oo xogteeda lagu kalsoon yahay. Marka uu sarreeyo Cabbirka Caadi-ahaanshaha kala-duwanaanta Dhirtu waxa uu sheegaa wanaagga caafimaadka dhirta, taas oo salka ku haysa barnaamijyada ku aroora xilliyada sannadka iyo helitaanka calafka. Tignoolajiyaddan horumarsan ee casriga ah ayaa suuragalisa la socodka iyo qiimaynta xilliga ku habboon maaraynta xaalad kasta, iyada oo fahan dhammaystiran ka bixinaysa xaaladaha calafka xoolaha. Astaanta muuqata ee Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya ayaa ah isku xidhka aqoonta deegaanka ee bulshooyinka xooladhaqata ah, khariiradaha dhul-beereedka iyo maamulka xuduudaha si loo go'aamiyo Goobo-waaxeedyada Caymiska (UAIs). Iskaashiga noocan ah ayaa lagu xaqiijin karaa in si xeeldheer loo fahmo xaaladaha u gaar ah daaqa iyo xilliyada hayaanka, taas oo kor u qaadaysa saxnaanta qiimaynta halista.

Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya ayaa adeegsada habka qasaare-gudka (payouts) aan joogtada ahayn oo la dardargaliyo marka uu halbeegga (NDVI), ka hoos maro heerkii la sii saadaaliyay. Korodhka qasaare-gudku (lacagaha ay hay'adaha caymisku dib ugu celiyaan xooladhaqatada caymiska ku jirta) waxa uu saammigal-qumman la leeyahay baaxadda ba'naanta dhibta /darnaanta yaraanta calafka, taas oo muujinaysa ka go'naansha in goor hore wax laga qabto xaaladaha abaareed ee bulshada soo foodsaara.

Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya, ayaa la tacaala caqabado u gaar ah oo ka dhasha laba xilli roobaad.  Xilliga ugu halista badani waa guga, oo ku beegan bilaha Abril illaa Juun, waxaana ku xiga xagaaga, oo ah xilli qallalan oo roob lahayn, waxaanu galaa bilaha Juun illaa Aktoober.   Deyrta oo ah xilliga labaad ee uu roobku ka da'o Soomaaliya, ayaa dhacda bilaha Aktoober illaa Diiseember, iyada oo uu ku xigo jilaal qallalan oo gala bilaha Diiseember illaa Maarso. Qaraamaadka caymiska (lacagaha lagu galo caymiska) ee suuragalka ah waxa istaraatiiji ahaan la sii daayaa dhammaadka bilaha qoyan(gu'da iyo deyrta),  xilliyada ay khatarahaasi jiraan, iyada oo lagu salaynayo celceliska qiimayaasha kumeelgaadhka ah ee xarunta NDVI.

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, ayay tahay in ay qayb libaax ka qaadato bixinta hagayaasha lama huraanka ah, kuwaas oo muhiim u ah heerarka hirgalinta Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya. Iskaashatadana waa in ay ku lugyeeshaan maamulka UAIs, dhinacyada caymiska, iyo qasaare-gud ku qotoma heerka baaxadda dhibta. Iskaashigu waxa uu kobcinayaa dejinta siyaasad sax ah, iyada oo barnaamijka la waafajinayo yoolasha iyo istaraatiijiyadaha guud ee qaranka. Sawirka Isdhexgalka hay'adaha fulinaya Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya, waxa lagu muujiyay (Jaantuska 5).

Barnaamijka Caymiska Xoolaha Soomaaliya, ayaa u taagan isbeddel aasaasi u ah caymis-xooleed oo waaritaan leh, adeegsiga tignoolajiyadda dayaxgacmeedka(satellite), aqoonta deegaanka, iyo isbeddelka hababka qasaare-gudka, si loo kobciyo awoodda ay xooladhaqatadu u leeyihiin iska caabinta saamaynta abaarta. Isbeddelkan aasaaska u ah caymiska xoolaha ayaa u gogolxaadhaya rejooyinka xoojinta adkaysiga iyo waaritaanka  marka ay soo foodsaaraan caqabadaha la xidhiidha cimiladu.




Jaantuska 5

# 6. Gunaanad

Qiimayntayadan, oo si ballaaran ugu kuurgashay xoolaha Soomaaliya, ayaa iftiimisay caqabado tiro badan, oo ay ka mid yihiin dhibaatooyinka deegaanka, cakirnaanta ganacsiga, kala-dhantaalnaanta qaabdhismeedyada sharciga, goldaloolooyinka siyaasadda iyo caqabadaha ku xeeran hirgalinta caymiska xoolaha.

Caqabadaha ku xeeran waxsoosaarka xoolaha, gaar ahaan, daaqa xoolaha ee tan-dhaafka ah iyo xero ka buuxdhaafinta xoolaha, waxa uga sii daray abaaraha, khilaafaadka, itaaldarrada dowladda, iyo goldaloolooyinka nidaamyada horumarinta xooladhaqatada reerguuraaga ah.

*"Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, ee Dowladda Federaalka, ayaa qayblibaax ka qaadata kormeerka barnaamijyada iyo siyaasadaha caafimaadka xayawaanka, sidaas awgeed, baadhitaankayagu waxa uu muujinayaa goldaloolooyin waaweyn oo ka jira tirada sharciyada iyo xeerarka lagu maamulo caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha*

Sida oo kale, caqabadaha ganacsiga xoolaha waxa ka mid ah yaraanta xarumaha karantiimada, dhaqaale xumada, cakirnaanta fursadaha helitaanka suuqa, iyo caqabadaha sharciga iyo kuwo amniga. Qaabdhismeedyada sharci ee hadda jira ayaa la kulmay caqabado laxaad leh, oo ay ku jiraan goldaloolooyin dhukmentiyada qoran, iyo la'aanta siyaasadaha iyo habraacyada lama huraanka ah. Qiimaynta lagu eegay xeer-dajinta iyo qaabdhismeedyada sharuucda caafimaadka xoolaha Soomaaliya, ayaa muujinaya dhaliilo waaweyn iyo goldaloolooyin abuuray caqabado la xiriira caafimaadka, daryeelka, iyo waaritaanka waxsoosaarka xoolaha dalka. Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, ee Dowladda Federaalka, ayaa qayblibaax ka qaadata kormeerka barnaamijyada iyo siyaasadaha caafimaadka xayawaanka, sidaas awgeed, baadhitaankayagu waxa uu muujinayaa goldaloolooyin waaweyn oo ka jira tirada sharciyada iyo xeerarka lagu maamulo caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha.

Qaabdhismeedyada xeer-dejinta ee muhiimka ah sida Xeerka Ilaalinta Caafimaadka Xawayaanka iyo Barnaamijka Aqoonsiga Caafimaadka Xoolaha, ayaa guud ahaan ba maqan, taas oo ay weheliyaan la'aanta xaddi badan oo hagayaal iyo mabaadii siyaasaseed iyo habraacyo kale ahi. Waxa intaas dheer, la'aanta qaabdhismeedyada sharci ee la xiriira shuruucda dhaqaalaha bulshada gobolka, hubinta tayada iyo shahaado-bixinta, gaar ahaan sharciga dawada iyo habraacyada shahaado-bixinta ee la xiriira waxsoosaarrada hilibka ka yimaadda. Waxyaabaha mudan in wax laga qabto ee la ogaaday ayaa ah goldaloolooyinka xeer-dejinta iyo qaabdhismeedyada shuruucda muhiimka u ah horumarinta caafimaadka, daryeelka, iyo joogtaynta waxsoosaarka xoolaha Soomaaliya. Hirgalinta dibuhabayno dhammaystiran iyo kala mudnaysiinta horumarinta goobaha muhiimka ah, ayay Soomaaliya ku xoojin kartaa adkaysiga xoolaheeda, isla markaana ugu tartami kartaa suuqyada xoolaha ee caalamiga ah, iyada oo hubinaysa badqabka xoolaheeda iyo bulshooyinka xooladhaqatada.

# 7. Tala bixinno

Waxa aannu soo jeedinaynaa talooyin xiriirsan oo looga golleeyahay in lagu kobciyo adkaysiga iyo baraaraha waxsoosaarka xoolaha Soomaaliya, iyada oo laga duulayo isbeddellada deegaanka, dhaqaalaha iyo siyaasadda-juquraafiyadeed, ee la xiriira arrimaha maamulka waxsoosaarka xoolaha, kobcinta ganacsiga xoolaha, xoojinta qaabdhismeedka sharciga, hirgalinta caymiska xoolaha iyo iskaashiga daneeyayaasha.

Talooyinkan ayaa xanbaarsan marrino-khariiradeed oo lagu xoojinayo xoolaha Soomaaliya, iyada oo kor loo qaadayo adkaysiga iyo kobcinta baraaraha xooladhaqatada. Soomaaliya, waxa ay waxsoosaarkeeda xoolaha si buuxda uga faa'iidaysan kartaa, oo ay irridaha ganacsiga ugu furi kartaa, isla markaana ugu gogolxaari kartaa hanashada adkaysinka iyo baraaraha mustaqbalka, in ay mudnaanta siiso waaritaanka maaraynta kawaxsoosaarka, kobcinta marinnada ganacsiga, xoojinta qaabdhismeedyada sharciga, hirgalinta caymiska xoolaha, iyo kobcinta iskaashiga daneeyayaasha.

- Si wax looga qabto dhibaatooyinka halista ah ee ku salaysan daaqa xoolaha ee tan-dhaafka ah iyo xero ka buuxdhaafinta xoolaha  ee la xiriirta maamulka waxsoosaaarka xoolaha, waa in la curiyaa istaraatiijiyado waaritaan leh, si kor loogu qaado masuuliyadda adeegsiga dhulka iyo maamulka daaqa. Intaas waxaa dheer, hirgelinta tillaabooyin lagu hagaajinayo xakameynta cudurrada iyo u adkaysiga cimilada, sida barnaamijyada tallaalka iyo dhaqannada maaraynta biyaha ee waaritaanka leh, ayaa lagama maarmaan u ah ilaalinta caafimaadka iyo waxsoosaarka neefka xoolaha ah.

- Kobcinta ganacsiga xooluhu waxa ay u baahan tahay in la horumariyo adeegyada karantiimaynta si loo hubiyo badqabka safrinta xayawaanka iyo kahortagga faafitaanka cudurrada. Fududaynta maalgashiga iyo hahabka maalgalinta ganacsiga xoolaha ayaa xoojin doona kobcinta dhaqaalaha iyo horumarinta suuqa, iyada kor loo qaadayo dadaallada lagu kobcinayo helitaanka fursadaha suuqa iyo xaqiijinta ku dhaqanka heerarka ilaalinta tayada, ayaa xoojinaya in ay Soomaaliya u tartanto suuqa xoolaha

- Waxkaqabashada goldaloolooyinka qaabdhismeedka sharciga Soomaaliya ayaa lama huraan u ah kor u qaadista caafimaadka, daryeelka iyo waaritaanka xoolaha. Arrintani waxa ay u baahan tahay in dibu-eegis iyo kaabis lagu sameeyo shuruucda jirta, in la dejiyo siyaasadaha iyo habraacyada muhiimka u ah xakamaynta cudurrada, daryeelka xawayaanka iyo shuruucda dhoofinta iyo soodejinta xoolaha, iyo in la xaqiijiyo iswaafajinta heerarka caalamiga ah iyo hab-dhaqannada ugu wanaagsan.

- Hirgalinta noocyada caymiska xoolaha ee dhaqaale ahaan la goyn karo, fursad ahaanna la heli karo, ayaa lama huraan u ah yaraynta khataraha iyo ilaalinta dhaqaalaha xooladhaqatada. Dadaallada lagu xallinayo caqabadaha xogta iyo kuwa isqardhaafka qiimayaasha la xiriirta caymiska xoolaha, iyo sida oo kale fududaynta hannaanka siyaasadda iyo kobcinta kaabayaasha ayaa ka qaybqaadanaya tisqaadka is-aamminaadda iyo kalsoonida ay isku qabaan daneeyayaashu.

- Iskaashiga u dhexeeya laamaha dowladda, hay'adaha sharciga, saaxiibada caalamka iyo bulshooyinka xooladhaqatada ah ayaa lafdhabar u ah isku xidhka dadaallada iyo hirgalinta dibuhabayno wax ku ool ah. In xooladhaqatada laga qaybgaliyo horumarka iyo hirgalinta siyaasadaha ayaa lagu kasban karaa hanashada hab-fikirkooda iyo waxyaalaha ay mudnaanta siinayaan, taas oo horseedaysa in lagu tallaabsado waxqabadyo loo dhan yahay, oo waaritaan leh.

## Xogo kabis ah

### Shaxanka S1: Doorka ay Sharciga Xoolaha ku leeyihiin Dowladda Soomaaliya iyo Ururrada Caalamiga ahi

| Magaca | Qeexitaanka |
|---|---|
| **Dowladda Soomaaliya** | Dowladdu waxa ay raacdaa xeerar ay iyadu dajisatay iyo siyaasado lagu maamulo caafimaadka iyo ganacsiga xoolaha. Waxa ka mid ah shuruudaha soodejinta iyo dhoofinta, habraacyada xakamaynta cudurrada, iyo heerarka daryeelka xayawaanka |
| **Ururka Caafimaadka Xayawaanka Adduunka(WOAH)** | Ururka Caafimaadka Xayawaanka Adduunka ayaa door lixaad leh ka ciyaara dejinta heerarka caafimaadka iyo daryeelka xayawaanka ee caalamiga ah. Waxa uu masuul ka yahay daabacaadda dukmentiyada muhiimka ah sida Xeerka Caafimaadka Xayawaanka Dhulka iyo Tilmaamaha Baadhitaannada Cudurrada iyo Tallaalka Xayawaanka Dhulka |
| **Ururka Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO)** | Ururka Cuntada iyo Beeraha waxa uu waxkaqabtaa caqabadaha caalamiga ah ee la xiriira beeraha, waxaanu bixiyaa hagayaal iyo talooyin kala duwan oo ku saabsan arrimaha maamulka iyo ganacsiga xoolaha nool. Waxa uu saamayn ku leeyahay kobcinta masuuliyadda hawlaha waxsoosaarka xoolaha ee waaritaanka leh |
| **Ururka Ganacsiga Adduunka (WTO)** | Ururka Ganacsiga Adduunku, waxa uu kormeeraa ganacsiga caalamiga ah. Heshiisyada Ururka Ganacsiga Adduunku waxa ay xoogga saaraan arrimaha muhiimka u ah beeraha iyo ganacsiga xoolaha sida Heshiiskii Dhaqangalinta Tallaabooyinka Fayadhowrka iyo Caafimaadka Dhirta, kaas oo si gaar ah uga hadlaya heerarka ku salaysan ganacsiga xoolaha. |
| **Dhaqaalaha Bulshooyinka Gobolka iyo Dowladaha Qaramada (RECs)** | Dhaqaalaha Bulshooyinka Gobolka, oo uu tusaale u yahay Midowga Afrika, badanaa waxa ay leeyihiin xeerar u gaar ah, oo lagu maamulo ganacsiga xoolaha ee deegaanna-dooda. Xeerarkani waxa ay u dhigmaan halbeegyo badan oo caalami ah, waxaanay gacan ka gaystaan iswaafajinta arrimaha gobolka. |

HERITAGE INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org